



VISIT OUR HEAD OFFICE ON:

MOGADISHU +252-61-7004471

VISIT OUR BRANCHES ON:

GAROWE	+252-90-7828338
BOSASO	+252-90-7797785
GALKAIO	+252-90-6795625
BAIDOA	+252-61-9414199
KISMAYO	+252-61-7604949
NAIROBI	+254-72-4095648

ALLAMAGAN BUSINESS CENTRE

Km4 , Airport Road, Mogadishu – Somalia

 info@takafulafrica.so
muqdisho@takafulafrica.so
medical@takafulafrica.so

 shirkada Takaful Insurance of Africa
 @takafulafrica

www.takafulafrica.so



Adeegyada Caymiska oo Lagu Jaangooyay Shareecada Islaamka

Shirkadda Caymiska ee Takaful Africa, Waa shirkad caymis ah oo ku dhisan nidaamka shareecada islaamka, si xalaal iyo xirfad sare lehna loogu maareeyo khataraha ku yimaada suuqyada geeska Afrika. Shirkadda oo waqti hore la aasaasay waxay geeska iyo bariga Afrika ka hawl gashay sanadkii 2008dii.

Shirkaddu waxay xarumo ku leedahay inta badan deegaannada ay Soomaalidu degto ee ku yaalla Geeska Afrika.

Qaabka Shaqadda

Hab maamulka iyo shaqada shirkadda Caymiska Takaful Afrika waxay waafaqsan tahay mabaadi'da Shareecada Islaamka, sidoo kale waxay shirkaddu u hoggaansan tahay xeer hoosaadyada heer qaran, mid gobol iyo heer caalamiba ee aan ka hor imaanayn Shareecada

Islaamka, taas oo ku jaan go 'an xeerarka caalamiga ah ee caymiska looga baahan yahay. Shirkadda Caymiska Islaamiga ah ee Takaful Afrika waxaa ka go'an in ay ku shaqayso hufnaan, daacadnimo iyo isla xisaabtan joogta ah.

Caymiska Caafimaadka

Takaful waxa ay bixisaa caymiska caafimaadka oo cayminaya baahiyaha caafimaad ee ka dhasha xanuunada kala duwan, waxaa kale oo ay caymisaa: xanuunada indhaha, ilkaha, iyo hooyada xaamilada ah adeegyada caafimaad ee ay u baahantahay.




Caymiska Gaadiidka

Takaful waxa kale oo ay bixisaa caymisyo kale sida kuwa baabuurta sida baabuurta gaarka loo leeyahay, kuwa ganacsiga, kuwa dawladda, Mootooyinka, Cagafyada IWM.



Caymiska Khataraha oo dhan

Caymiskani waa caymiska ugu ballaaran ee
Takaful bixiso wuxuuna caymiyaa khasaaraha
iyo burburka ka dhasha kuna dhaca hantida
caynsan.



Caymiska Mas'uuliyadda

Caymiskani wuxuu caymiyaa mas'uuliyadda sharciyeed ee ka dhalata dayaca shaqaaluhu ka gaystaan goobta ay ka shaqeeyaan ama qofka shaqadda lagu aaminay. Arintan oo sababi karta khasaaro balaaran oo soo gaara cidda ama shirkadda shaqada leh.



Caymiska badeecadda socdaalka ah

Caymiska badeecadda socdaalka ah waa u muhiim ganacsiga, wuxuuna daboolaa khataraha khasaare ee ku imaankara badeecadda inta ay socdaalka ugu jirto goobta alaabta laga soo qaadayo ilaa goobta u danbaysa ee la gaynayo.



Caymiska Dabka

Caymiska dabka eeTakaful waxa uu daboolaa khasaaraha ku yimaada hantida kala duwan ee dabku gaysto , oo qarax ama holac ama olol gaas sababo



Caymiska Lacagta

Lacagtu waa hal-bawlaha dhaqaalaha, waana shayga dadku ku wada macaamilaan ganacsigooda, sidaa awgeed Takaaful waxa ay bixisaa caymis daboolaya magdhawga xatooyada iyo dhaca ku yimaada lacagta inta ay ku jirto socdaalka ama safarka, guriga dhexdiisa ama goobta shaqada.



Caymiska Safarada

Caymiska safarada waxuu cayminayaa shilalka ku iman kara qofka safraya sida, dhaawaca, dhimasho, ama xaaladaha caafimaad oo degdeg ah.

